# PUNTLAND

## Wasaaradda Caafimaadka

# Siyaasadda Daboolida Kharashaadka Adeegyada Caafimaad Ee Puntland

Moh.pl.so

minister.moh@plstate.so

## TUSMADA

Erey- Bixin ....................................................................................................2
1. Hordhac ....................................................................................................3
1.1 Ujeedooyinka Siyaasadda ....................................................................................................4
1.2 Baaxadda Siyaasadda ....................................................................................................5
1.3 Asbaabta Loo Dejiyey Siyaasadda ....................................................................................................5
1.4 Mabaadi'da Hagaya Hirgelinta Siyaasadda ....................................................................................................6
1.4.11 Mabda'a Maareynta Khataraha ....................................................................................................7
2. Aragtida, Himilada, Iyo Hadafka Siyaasadda ....................................................................................................7
2.1 Aragtida ....................................................................................................7
2.2 Himilada ....................................................................................................7
2.3 Hadafka Guud ....................................................................................................8
3. Saldhigyada Sharci ee Jira ....................................................................................................8
3.1 Dastuurka Dawladda Puntland: ....................................................................................................8
3.2 Xeerka Qaanuunka Caafimaadka ee 2000 ....................................................................................................8
4. Geedi socodka Siyaasadda iyo La-tashiga bahwadaagta caafimaadka ....................................................................................................9
4.1 Hab-raaca Dajinta Siyaasadda ....................................................................................................9
5. Jihooyinka Siyaasadda ....................................................................................................9
5.1 Jihaynta 1aad: Dejinta iyo Hirgelinta Qaab-dhismeedka Khidmadda Adeegyada Caafimaadka (liiska qiimaha adeegyada) ....................................................................................................10
5.2 Jihada 2aad: Habka Dajinta Iyo Hirgalinta Nidaamka Dakhli Aruurinta ....................................................................................................11
5.3 Jihada 3aad: Dhisidda Nidaam Maareyn Maaliyadeed Oo Xooggan ....................................................................................................12
5.4 Jihada 4aad: Ka-Qayb-Galka Bulshada Ee Maamulka Iyo Kormeerka ....................................................................................................13
5.5 Jihada 5aad: Kormeer Iyo Qiimeyn joogto ah ....................................................................................................14
6. Hirgalinta iyo Ansixinta Siyaasada ....................................................................................................15
6.1 Doorarka Iyo Wajibaadka Hay'adaha Hirgelinta Siyaasadda ....................................................................................................15
6.2 Dhisidda fahamka guud iyo Tababarada shaqaalaha ....................................................................................................17
6.3 Hirgelin Tijaabo ah (pilot phase).............................. Error! Bookmark not defined.
6.4 Wacyigelin iyo Isgaarsiin Dadweyne ....................................................................................................17
6.5 Ansixin, Dhaqan-Gal iyo Wax-kabadel ....................................................................................................18
7. Gunaanad .............................................................. Error! Bookmark not defined.

## Erey- Bixin

**Wasaarad:** waxaa loola jeedaa wasaaradda Caafimaadka Puntland

**Wasiir:** waxaa loola Jeedaa Wasiirka Wasaaradda Caafimaadka Puntland

**La awoodi karo:** Waxaa loola jeedaa khidmada ay bixinayaan dadyowga ubaahan adeega Caafimaad iyadoon wax culeys ah la saareyn, tahayna khidmadaas mid ay awoodaan.

**Daboolista Kharashka:** waxaa loola jeedaa hannaan kaabis qorshaysan oo loo dejiyey si loo hubiyo in adeegyada caafimaadku sii socdaan, gaar ahaan xilliyada uu hakadka kuyimaado taageerada dibada, iyada oo aan culeys lagu saarayn dadka nugul iyo kuwa dhaqaalahoodu hooseeyo.

**Wadaaga Kharashka:** waxaa loola jeedaa hab kharashka adeega Caafimaadka si wada jir ah loo qaadayo qaybna ay bixinayaan adeeg bixiyayaasha (Dawladda, xarumaha caafimaad i.w.m) halka qaybta kale laga rabo isticmaalaha ama bukaanka.

**Helitaan loo simanyahay:** waxaa loola jeeda in Adeega caafimadku uu noqdo mid loo simanyahay, cadaalad ah iyadoon wax culeys ah la saarayin dadka nugul iyo kuwa dhaqaalahodu hooseeyo.

**Ka-dhaafitaan/ka-dhimid:** waxaa loola jeedaa hab aan culeys lahayn oo dadka nugul iyo kuwa dakhligoodu hooseeyo looga dhaafayo ama looga dhimayo khidmadaha, iyadoo la hubinayo habraacyada cad ee siyaasadani dajinayso.

**Joogtaynta maaliyadeed:** waxaa loola jeedaa awooda nidaamka caafimaadku uleeyahay inuu daboolo kharashaadkiisa hada iyo kuwa mustaqbalka, iyadoo aan lagu tiirsanyn taageero dibadeed oo kumeel gaar ah si aan hoos loogu dhigin tayada iyo helitaanka adeega caafimaad.

**Maalgalinta Caafimaadka:** waxaa loola jeeda nidaamka lagu helo, lagu maamulo, laguna bixiyo dhaqaalaha loogu tala galay adeegyada Caafimaadka, si loo hubiyo in qof walba helay daryeel caafimaad oo tayo leh, waqtigiisi ah, isla markaana la awoodi karo.

**Kharashka jeebka**: waxaa loola jeedaa lacagta uu bukaanku si toos uga bixiyo jeebkiisa marka uu helo adeeg caafimaad, iyada oo aanay jirin caymis, kaalmayn dawlad ama sanduuq caafimaad oo kharashkaas daboolaya.

**Helitaan Dakhli:** waa habka iyo hanaanka lagu abuurayo, laguna helayo dakhli (lacag) si loo daboolo adeegyada caafimaad heerarkooda kala duwan.

**Kabid kharash:** waxaa loola jeedaa taageero dhaqaale oo ay bixinayaan Dawladda ama deeq-bixiyayaasha si loo yareeyo khidmada uu bixinayo bukaanka.

**Khidmada Bukaanka:** waxaa loola jeedaa lacagta laga qaadayo bukaanka ama qofka loo fulinayo adeega caafimaad.

**Xarun caafimaad**: waa goob si rasmi ah u bixisa adeegyo caafimaad, taas oo ay dadku tagaan si ay u helaan daryeel, ka-hortag, ama daaweyn caafimaad.

**Heerka Koowaad:** Waxaa loola jeedaa adeegyada caafimaadka aasaasiga ah ee lagu bixiyo xarumaha caafimaadka hoose, kuwaas oo diiradda saaraya ka-hortagga cudurrada, daryeelka guud, tallaalka, hooyada iyo dhallaanka iyo adeegyada caafimaad ee aasaasiga ah, kuwaas oo inta badan bilaash ah ama si weyn siyaasadani ukabayso.

**Heerka Labaad:** Waxaa loola jeedaa adeegyada caafimaadka ee heer dhexe oo lagu bixiyo isbitaallada degmooyinka ama isbitaallada gobollada, kuwaas oo bixiya daaweyn iyo baaritaanno ka sarreeya heerka koowaad ayna ka mid yihiin qalliinnada fudud, daryeelka bukaannada la seexiyo iyo adeegyada shaybaarka, iyadoo laga qaadi karo khidmad adeeg sida uu qabo nidaamka siyaasaddan.

**Heerka Saddexaad:** Waxaa loola jeedaa adeegyada caafimaadka ee heer sare oo takhasus leh, laguna bixiyo isbitaallo gaar ah ama xarumo takhasus gaar ah leh, kuwaas oo bixiya daaweyn heerkeedu sareeyo, qalliinnada waaweyn iyo adeegyada takhasuska sare sida kuwa ugaarka ah Indhah, Lafaha, wadnaha I.W.M, isla markaana inta badan laga qaado khidmad adeeg si loo daboolo kharashka sare ee adeegyadaas.

**Ka-reebid/ka dhimid**: waxaa loola jeedaa ogolaansho kumeel gaar ah oo bukaanka looga dhimayo ama looga daynayo khidmada adeega Caafimaadka.

## 1. Hordhac

Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka ee Puntland waa hannaan si qorshaysan loo dejiyey, ujeeddadiisuna tahay in la hubiyo in adeegyada caafimaadku ay sii socdaan oo aanay istaagin, gaar ahaan xilliga ay yaraadaan ku tiirsanaanta taageerada caalamka. Siyaasaddu waxay ka jawaabaysaa baahida loo qabo in la helo nidaam dhaqaale oo waara, kaas oo suurtagelinaya in adeegyada caafimaad lagu bixiyo si joogto ah oo tayo leh.

Siyaasaddu waxay hiigsanaysaa dhisidda nidaam daboolis kharash oo caddaalad ah, daahfuran, isla markaana waara, iyadoo si gaar ah u ilaalinaysa in dadka nugul aan lagu saarin culays dhaqaale oo ka hor istaagi kara helitaanka adeegyada caafimaadka. Waxay isku dheellitiraysaa baahida loo qabo in xarumaha caafimaadku helaan kheyraad ay ku shaqeeyaan iyo xaqa muwaadiniinta ee ah in ay helaan adeeg caafimaad oo la heli karo isla markaana la awoodi karo.

Siyaasaddu waxay faahfaahinaysaa mabaadi'da hagaya, ujeeddooyinka guud, jihaynta siyaasadeed, iyo istaraatiijiyadaha lagu hirgelinayo daboolista kharashaadka xarumaha caafimaadka. Waxa ay dejinaysaa habab cad oo lagu ururinayo laguna maamulayo dakhliga,

laguna hubinayo daahfurnaan, isla-xisaabtan, iyo ka-qaybgal bulsho. Sidoo kale, siyaasadda ayaa tilmaamaysa doorka hay'adaha kala duwan, laga bilaabo Wasaaradda Caafimaadka ilaa heerka xarumaha caafimaadka iyo bulshada.

Siyaasaddu waxay hubinaysaa in baahiyaha caafimaad ee dhammaan xubnaha bulshada la tixgeliyo, iyadoo mudnaan gaar ah siinaysa adeegyada aasaasiga ah, carruurta, haweenka, dadka naafada ah, iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Waxay la jaanqaadaysaa mudnaanta caafimaadka Puntland, shuruucda dalka, iyo hab-raacyada caalamiga ah ee la aqoonsan yahay, si loo xaqiijiyo in nidaamka caafimaadku noqdo mid caddaalad ah oo la isku halayn karo.

Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka ma aha oo keliya dukumeenti farsamo, balse waa muujin ballanqaad wadajir ah oo ku saabsan caddaaladda caafimaadka, joogtaynta dhaqaale, iyo mas'uuliyadda wadajirka ah ee dawladda, bulshada, iyo bahwadaagta horumarinta caafimaadka. Waxaa la rajaynayaa hirgalinta siyaasaddani inay keeni doonto isbeddel muuqda oo ku saabsan tayada, helitaanka iyo joogtaynta adeegyada caafimaadka dhammaan deegaanada Puntland.

## 1.1 Ujeedooyinka Siyaasada

Siyaasadani waxay ka duuleysaa ujeedooyinkan hoos ku xusan:

1) **Dhisidda Hannaan Dhaqaale oo Waara**
   In la dhiso hannaan dhaqaale oo nidaamsan oo loogu talagalay in lagu maamulo kheyraadka caafimaadka, si xarumaha caafimaadku u helaan ilo dhaqaale oo joogto ah, si ay usii wadaan hawlgalkooda, una daboolaan kharashaadka muhiimka ah sida daawooyinka, qalabka, iyo dayactirka, iyada oo la hubinayo in nidaamku noqdo mid sharciyeysan oo la xisaabtan sax ah leh.
2) **Ilaalinta Dadka Saboolka ah iyo Kuwa Nugul**
   Siyaasaddu waxay si cad u damaanad qaadaysaa in lacag-qaadistu aysan noqon caqabad ka hor istaagta dadka saboolka ah iyo kooxaha nugul helitaanka adeeg caafimaad, iyadoo la dejinayo nidaamyo ka-dhaafid iyo taageero gaar ah oo xaqiijinaya helida caddaalad bulsho oo dhamaystiran.
3) **Dejinta Nidaamyo Cad oo ka dhan ah Khidmadaha Adeegyada Caafimaadka**
   Siyaasaddu waxay dejinaysaa tilmaamo cad oo lagu qaabeynayo, laguna hirgelinayo khidmadaha adeegyada caafimaadka, si ay u noqdaan kuwo la awoodi karo, si cad loo shaaciyey, isla markaana looga hortago lacag-qaadis aan sharci ahayn.
4) **Xoojinta Maamulka Maaliyadeed iyo Daahfurnaanta**
   Siyaasaddu waxay ujeedadeedu tahay in la xoojiyo maamulka maaliyadeed, isla xisaabtanka, iyo daahfurnaanta, iyadoo la hubinayo in dakhliga laga helo daboolista

kharashaadka si sax ah loo diiwaangeliyo loona isticmaalo horumarinta adeegyada caafimaadka.

5) **Dhiirrigelinta Ka-qaybgalka Bulshada**
Siyaasaddu waxay aqoonsanaysaa doorka muhiimka ah ee bulshada ku leedahay ka guul gaarista habraacan, waxayna dhiirrigelinaysaa ka-qaybgalka hoggaamiyeyaasha bulshada iyo guddiyada caafimaadka si loo xoojiyo kalsoonida iyo dhaqan galka siyaasadda.

## 1.2 Baaxadda Siyaasadda

Baaxadda Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka ee Puntland waxay quseysaa dhammaan xarumaha caafimaadka Dawladda ee Puntland, gaar ahaan isbitaallada gobollada iyo degmooyinka halkaas oo daboolista kharashaadku ku habboon yahay.

Siyaasaddu waxay diiradda saaraysaa adeegyada heerka labaad iyo saddexaad, iyadoo ilaalinaysa in adeegyada aasaasiga ah ee bulshada ee heerka 1aad ay sii ahaadaan bilaash ama si weyn loo kaabo. Hirgelinta siyaasaddan waxaa lagu saleynayaa nidaamyo khidmadeed oo adeeg ee ka-dhaafid dadka nugul, iyo in dakhliga la helay dib loogu isticmaalo hawlgalka iyo tayada adeegyada caafimaadka.

## 1.3 Asbaabta Loo Dejiyey Siyaasadda

Wasaaradda caafimaadka ee Puntland muddo dheer waxay ku tiirsanayd isku dhaf maalgelineed oo ka timaadda deeq-bixiyeyaasha dibadda iyo Dawladda Puntland si loo sii wado bixinta adeegyada caafimaadka aasaasiga ah. Si kastaba ha ahaatee, sannadihii u dambeeyey hoos u dhaca taageerada deeq-bixiyeyaasha oo sii yaraanayay taas oo ay sababab u aheyd isbeddellada dhaqaalaha caalamka, kala duwanaanta mudnaanta, iyo saameynta cudurka COVID-19, ayaa sababay farqi weyn oo dhanka maalgelinta ah oo ka jira xarumaha caafimaadka ee Dawladda.

Isbitaallo iyo xarumo caafimaad oo badan ayaa wajahaya yaraansho daawooyin, qalab caafimaad, iyo shaqaale xirfad leh, taas oo keentay hakad ku yimaada adeegyada iyo hoos u dhac ku yimaada tayada daryeelka, isla markaana qoondaynta miisaaniyadda Dawladda ee waaxda caafimaadku weli way ka hooseysaa heerarka caalamiga ah ee lagu taliyey, taas oo xaddidaysa awoodda Dawladda ay ku dabooli karto baahida sii kordhaysa ee adeegyada caafimaadka ee magaalooyinka iyo miyigaba. Xaaladdan awgeed, hirgelinta siyaasad daboolis kharash oo si wanaagsan loo qaabeeyey waxay noqoneysaa xal macquul ah oo lagu sii wadi karo hawlgalka xarumaha caafimaadka, lagu hagaajin karo hufnaanta, laguna yareyn karo ku-tiirsanaanta maalgelinta deeq-bixiyeyaasha oo marar badan aan la hubin.

Wasaaradda Caafimaadku waxay Xukuumadda Dawladda Puntland wakiil uga tahay fududeynta iyo diyaarinta nidaamyo sharci oo lagu taageerayo helitaanka Adeegyo caafimaad oo tayo leh, islamarkaana ku salaysan daahfurnaan iyo cadaalad dhamaystiran,

Hirgelinta Siyaasada daboolista kharashaadka ee Puntland looguma talagelin in adeegyada caafimaadka laga dhigo kuwo ganacsi, balse waa in la dhisaa nidaam caddaalad ah oo daahfuran, isla markaana isku dheelli tira joogtaynta dhaqaale iyo sinaanta helitaanka adeegyada, iyadoo loo oggolaanayo xarumaha caafimaadka inay daboolaan qayb ka mid ah kharashkooda hawlgal taas oo loo marayo khidmadaha adeegyada ee la nidaamiyey iyo sanduuqyada caafimaadka bulshada.

Siyaasaddani waxay xoojinaysaa lahaanshaha adeegyada caafimaadka iyo isla xisaabtanka maalgelinta caafimaadka.

Sidoo kale, iyadoo la dejinayo nidaamyo cad oo ka-dhaafid iyo dhimid lacageed ah, siyaasaddani waxay ilaalinaysaa dadka nugul, sida:

- Carruurta
- Haweenka uurka leh iyo
- Qoysaska dakhligoodu hooseeyo,

Habkan wuxuu taageerayaa ujeeddada guud ee ah in la dhiso nidaam caafimaad oo adkaysi leh, is-ku-filan, isla markaana awood u leh inuu bixiyo adeegyo caafimaad oo tayo leh, la heli karo, kuna salaysan caddaalad ay u dhanyihiin dhammaan dadka reer Puntland.

## 1.4 Mabaadi'da Hagaya Hirgelinta Siyaasadda

- **Sinaan iyo Cadaalad:** Nidaamka daboolista kharashaadku ma aha mid ka hor istaagaya dadka saboolka ah iyo kuwa nugul helitaanka adeegyada caafimaadka, taas badalkeeda waa adeeg hufan, la heli, karo, dadkuna u simanyihiin isla markaana ku tiirsan sinaan iyo cadaalad.
- **Ka-qaybgal Bulsho:** Bulshada deegaanka waxay qayb ka ahaanayaan qorshaynta iyo hirgelinta nidaamka daboolista kharashaadka, doorkooduna wuxuu ahaanayaa mid cad oo muuqda sidoo kale waxay qayb ka ahaanayaan go'aan gaarista siyaasadan.
- **Daahfurnaan:** Bulshada waxaa si cad loogu wargeliyaa sababta lacagaha loo qaadayo iyo sida loo isticmaalayo.
- **Isla Xisaabtan:** Lacagaha la ururiyo waa in si sax ah loo maareeyo loona soo sheego hay'adaha ay khusayso.
- **Joogtaynta:** Nidaamku waa inuu hubiyaa sii socodka adeegyada caafimaadka mustaqbalka.
- **U Hoggaansanaanta Sharciyada:** Hirgelintu waa inay waafaqsanaataa shareecada islaamka, Dastuurka Dawladd Puntland iyo xeerarka kale ee dalka uyaal.

### 1.4.11 Mabda'a Maareynta Khataraha

Hirgelinta Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Adeegyada Caafimaadka waa in ay mar walba ku salaysnaataa mabda'a ah in aan waxyeello loo geysan helitaanka adeegyada caafimaadka, gaar ahaan kuwa ay helaan dadka nugul iyo qoysaska dakhligoodu hooseeyo. Sidaa darteed, dhammaan go'aannada la xiriira dejinta khidmadaha, qaadista lacagaha, iyo maareynta dakhliga waa in si joogto ah loo qiimeeyaa si loo hubiyo inaysan dhalin caqabado dhaqaale ama bulsho oo ka hor istaaga muwaadiniinta helitaanka daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah.

Wasaaradda Caafimaadka iyo hay'adaha kale ee hirgelinta ku lugta leh waa in ay qaataan hab ka hortag ah, iyagoo xilli hore aqoonsanaya maareynayana khatar kasta oo iman karta, gaar ahaan hoos u dhaca helitaanka adeegyada caafimaadka, kordhinta kharashka jeebka, ama ku xadgudubka mabda'a sinaanta iyo caddaaladda. Marka la ogaado in hirgelinta siyaasadda ay keentay saameyn taban oo ku wajahan kooxaha nugul, tallaabooyin degdeg ah oo saxitaan ah waa in la qaadaa, oo ay ku jiraan dib-u-eegista khidmadaha, ballaarinta ka-dhaafidda, ama hakinta ku-meel-gaarka ah ee qaadista khidmadaha qaarkood.

Mabda'ani wuxuu hubinayaa in siyaasadda daboolista kharashaadku ay noqoto mid taageerta joogtaynta dhaqaale ee xarumaha caafimaadka, iyada oo isla markaana ilaalinaysa xaqa aasaasiga ah ee muwaadiniinta Puntland u leeyihiin helitaanka adeeg caafimaad oo la heli karo, la awoodi karo, kuna salaysan caddaalad.

# 2. Aragtida, Himilada, Iyo Hadafka Siyaasada

## 2.1 Aragtida

Aragtida siyaasaddan waa in la xaqiijiyo in dhammaan dadka reer Puntland ay helaan adeeg caafimaad oo tayo leh, la heli karo, isla markaana qof walba awoodi karo, iyada oo aan lacagtu noqon caqabad ka hor istaagta muwaadininta helitaanka daryeel caafimaad oo waara.

## 2.2 Himilada

Himilada siyaasaddan waa in la dejiyo lana hirgeliyo nidaam cad, caddaalad ah, oo daahfuran oo lagu daboolo laguna wadaago kharashaadka adeegyada caafimaadka, si xarumaha caafimaadku u sii shaqeeyaan, loona wanaajiyo tayada adeegyada, iyadoo la ilaalinayo dadka nugul.

## 2.3 Hadafka Guud

Hadafka guud ee siyaasaddan waa in la hubiyo sii socodka adeegyada caafimaadka Puntland, in la yareeyo ku-tiirsanaanta deeqaha dibadda, isla markaana la xaqiijiyo in dhammaan bulshada, gaar ahaan dadka saboolka ah, ay helaan daryeel caafimaad oo cadaalad ah oo joogto ah.

# 3. Saldhigyada Sharci ee Jira

### 3.1 Dastuurka Dawladda Puntland:

Dastuurka Dawladda Puntland **qodobkiisa 33aad**, oo cinwaankiisu yahay **"Caafimaadka"**. wuxuu ka hadlayaa adeegyada caafimaadka, Qodobkani wuxuu qeexayaa waajibaadka iyo ujeeddooyinka dowladda ee la xiriira daryeelka caafimaadka bulshada.

Dowladdu waxay mas'uul ka tahay xaqiijinta caafimaadka dadweynaha, iyadoo bixineysa adeegyo caafimaad oo ka hortag ah iyo kuwo daaweyn ah, gaar ahaan carruurta iyo haweenka. Si waajibaadkan loo fuliyo, dowladda waxaa saaran masuuliyadda dhisidda iyo horumarinta nidaam caafimaad oo tayo sare leh, kaas oo awood u leh bixinta adeegyo caafimaad oo la isku halayn karo.

Sidoo kale, Dastuurku wuxuu oggolaanayaa jiritaanka iyo shaqeynta xarumaha caafimaadka gaarka loo leeyahay, hase yeeshee shaqadooda waxaa nidaaminaya sharci, waxaana kormeeri doonta Wasaaradda oo xukuumada Puntland wakiil uga ah arimaha la xiriira bixinta adeegyada caafimaadka. Qodobadani waxay muujinayaan sida Puntland uga go'an tahay horumarinta caafimaadka bulshada iyo hubinta in muwaadiniintu helaan adeegyo caafimaad oo la heli karo.

### 3.2 Xeerka Qaanuunka Caafimaadka ee 2000

Xeerka Qaanuunka Caafimaadka ee 2000 waa saldhigga sharci ee bixinta adeegyada caafimaadka ee Puntland. Sharcigani wuxuu qeexayaa doorarka iyo waajibaadka hay'adaha kala duwan ee ku lugta leh arrimaha caafimaadka, wuxuuna dejinayaa habab lagu nidaaminayo adeegyada caafimaadka iyo habka ay u shaqeeyaan xarumaha caafimaadka.

Xeerkan wuxuu muhiim u yahay hubinta in adeegyada caafimaadka loo bixiyo si nidaamsan, caddaalad ah, isla markaana uu jiro isla-xisaabtan. **Qodobka 8aad** ee xeerka Qaanuunka Caafimaadka wuxuu si gaar ah u xoojinayaa hirgelinta nidaamka daboolista kharashaadka (cost recovery system) ee Puntland, taas oo sharci ahaan saldhig u ah siyaasaddan daboolista kharashaadka adeegyada caafimaadka.

Siyaasada Daboolista Kharashaadka Adeegyada Caafimaadka Puntland waxay si buuxda u waafaqsantahay Shareecada Islaamka, Dastuurka Dowladda Puntland iyo Xeerka Qaanuunka Caafimaadka Puntland.

# 4. Geedi socodka Siyaasadda iyo La-tashiga bahwadaagta caafimaadka

Diyaarinta Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka ee Puntland waxay ku salaysnayd la-tashi ballaaran oo ay hoggaaminaysay Wasaaradda Caafimaadka Puntland, kaas oo si rasmi ah u dhacay 24-ka Juun 2025. La-tashiyadaas waxaa qayb ka ahaa hoggaanka Wasaaradda Caafimaadka, Iskuduweyaasha gobollada, agaasimayaasha isbitaallada, iyo bahwadaagta caafimaadka ee ka shaqeeya Puntland. Sidoo kale, booqashooyin rasmiya ayaa lagu tagay isbitaallo la doortay si loo qiimeeyo nidaamka khidmadaha adeegyada ee hadda jira, loogana ururiyo xog dhab ah oo ku saabsan caqabadaha iyo fursadaha jira.

Intii lagu jiray la-tashiyada, ka-qaybgalayaashu waxay ka wada hadleen xaaladda guud ee arimaha caafimaadka, isbeddellada jira, caqabadaha waaweyn iyo guulaha la gaaray. Doodahaas ayaa lagu gaaray is-afgarad ku saabsan jihada siyaasadeed ee daboolista kharashaadka, iyadoo la tixgelinayo xaaladda arrimaha caafimaadka Puntland, baahiyaha bulshada, iyo casharrada laga bartay Dalalka dariska ah, nidaamyada noocan oo kale ah oo ay dajisteen kuwaaso badankood noqdey kuwo guuleystay. Waxaa si guud la isku raacay in siyaasaddani ay door muhiim ah ka ciyaarayso horumarka dhaqaale iyo bulsho, isla markaana ay wax weyn ka tari doonto hagaajinta caafimaadka iyo fayo-qabka bulshada Puntland.

Hirgelinta iyo diyaarinta siyaasaddan waxaa suurtageliyey ka-qaybgal firfircoon oo ay sameeyeen daneeyeyaasha kala duwan, kuwaas oo si wax ku ool ah u soo jeediyey talooyin iyo aragtiyo qiimo leh. Siyaasaddani waxay astaan u tahay ballanqaadka Wasaaradda Caafimaadka iyo bahwadaagteeda horumarinta adeegyada caafimaadka iyo sugidda kheyraad dhaqaale oo waara.

## 4.1 Hab-raaca Dajinta Siyaasada

Diyaarinta siyaasadda daboolista kharashaadka waxay qaadatay muddo ku dhow 3bilood , waxaana la raacay hab-raac cad oo ay ka mid ahaayeen dib-u-eegis siyaasaddo hore, la-tashiyo daneeyayaal iyo booqashooyin goobaha qaar ah. Siyaasadaha dib loo eegay waxaa ka mid ahaa siyasadaha iyo qorshayaasha caafimaadka ee Soomaaliya, gaar ahaan Qorshaha Istaraatiijiga ah ee Qaybta Caafimaadka iyo siyaasadaha dalalka dariska la ah Soomaaliya. La-tashiyada waxaa ka qaybqaatay saraakiisha wasaaradda, ururrada bulshada iyo bahwadaagta caafimaadka, halka booqashooyin rasmi ah lagu tagay magaalooyinka Puntland si xog dhab ah looga helo heerarka kala duwan ee gobollada iyo degmooyinka.

# 5. Jihooyinka Siyaasadda

Si loo hubiyo maalgelin dheellitiran oo ku aadan adeegyada Caafimaadka Puntland, siyaasadda daboolista kharashaadka waxa ay ujeedadeedu tahay in la hirgeliyo nidaam wax ku ool ah oo taageera sii socoshada adeegyada caafimaadka iyada oo aan la carqaladeyn helitaanka adeegyada

aasaasiga ah. Siyaasaddu waxay ku dhisan tahay mabaadiida sinnaanta, daahfurnaanta, iyo joogtaynta, si dadka saboolka ah aan culays dhaqaale loo saarin, isla markaana nidaamka caafimaadka loogu helo taageero dhaqaale oo waara.

Wasaaraddu waxa ay hirgelin doontaa nidaam khidmad adeeg oo daahfuran kana kooban heerar kala duwan, kaas oo ilaalinaya dadka dakhligoodu hooseeyo iyo kooxaha nugul, isla markaana u oggolaanaya xarumaha caafimaadka in ay daboolaan qaybo ka mid ah kharashaadka hawlgalka. Siyaasaddu waxa ay damaanad qaadaysaa ka-dhaafid iyo ka-reebid loogu talagalay dadka nugul, waxaana la sameyn doonaa qiimeyn iyo wacyigelin joogto ah si loo hubiyo in caddaaladda iyo u sinaanta adeegyada caafimaad ay yihiin kuwo la ilaaliyey.

Qodobada hoos ku xusan waa jihaynta siyaasadeed ee muhiimka ah ee la qaadan doono si loo xaqiijiyo daboolis kharash oo wax ku ool ah, iyada oo la ilaalinayo mabaa'diida sinnaanta, daahfurnaanta, iyo joogtaynta.

## 5.1 Jihaynta 1aad: Dejinta iyo Hirgelinta Qaab-dhismeedka Khidmadda Adeegyada Caafimaadka (liiska qiimaha adeegyada)

Jihaynta koowaad ee siyaasadda waxay ku saabsan tahay dejinta iyo hirgelinta nidaam mideysan oo caddaalad ah oo lagu qiimeeyo adeegyada caafimaadka ee laga bixiyo xarumaha Dowladda Puntland. Iyadoo la raacayo xidhmada adeegyada caafimaadka muhiimka ah, adeegyada aasaasiga ah gaar ahaan kuwa ay helaan dadka nugul, waxay ahaanayaan bilaash.

Sidoo kale waxaa jiri doona khidmad adeeg oo si nidaamsan looga qaadi doono adeegyada la xushay ee laga bixiyo isbitaallada iyo xarumaha heerka labaad iyo saddexaad, si loo hubiyo joogtaynta iyo tayada adeegyada caafimaadka ee Puntland.

- **Ka-dhaafid / ka dhimidda Khidmadda:**

Waxaa si buuxda looga dhaafayaa khidmadaha adeegyada caafimaadka dadkan hoos ku xusan:

- Dadka qaba xanuunada HIV iyo TB
- Maxaabiista ka timaada xabsiyada Dawladdu aqoonsantahay.
- Dadka baahiyaha gaarka ah qaba gaar ahaan naafada.
- Dadka la nool xanuunada dhimirka.

Ka-dhaafiddan waxay muujinayaan ballanqaadka Puntland ee ku aaddan in adeeg caafimaad uu gaaro qof walba, isla markaana la ilaaliyo dadka ugu awoodda yar bixinta kharashka adeegyada Caafimaadka.

**Hoos waxaa ku xusan Adeegyada laga Dhaafay khidmadaha/lacagta dhammaan bulshada:**

| No | Nooca adeega | Faah-faahin |
|---|---|---|
| 1 | Tallaalka | In lagu sii wado bilaash adeegyadan inta ay socdaan taageerada dibbada ah |
| 2 | Daaweynta TB, iyo HIV | In lagu sii wado bilaash adeegyadan inta ay socdaan taageerada dibbada ah |
| 3 | Daaweynta nafaqo darrida | In lagu sii wado bilaash adeegyadan inta ay socdaan taageerada dibbada ah |
| 4 | Xaaladaha deg-dega ah | In lagu sii wado bilaash adeegyadan inta ay socdaan taageerada dibbada ah |

**F.G.** Dhammaan adeegyada khidmaddu ku waajibtay waxay ku lifaaqanyihiin siyaasaddan.

## 5.2 Jihada 2aad: Habka Dajinta Iyo Hirgalinta Nidaamka Dakhli Aruurinta

Jihada labaad ee siyaasaddu waxay dejinaysaa habka ku kalsoonaanta saxda ah iyo isla xisaabtanka. Habkani waa nidaam cad oo lagu ururinayo laguna maamulayo lacagaha laga qaadayo adeegyada caafimaadka qaarkood, si loo hubiyo isla xisaabtanka, daahfurnaanta iyo isticmaalka saxda ah ee dakhliga imaanaya.

- **Habka Adeegyada Caafimaad ee Lacagta ah;**

  Khidmadaha waxaa laga qaadi doonaa adeegyada caafimaadka ee aan aasaasiga ahayn, sida la-tashiyada qaarkood, baaritaannada caafimaad, iyo qalliinnada ikhtiyaarka ah, iyadoo la hubinayo in adeegyada aasaasiga ah ay sii ahaadaan kuwo la awoodi karo ama bilaash u ah dadka nugul. Qaab-dhismeedka khidmadaha adeegyada waa in si cad loo shaaciyaa isla markaana la mideeyaa dhammaan xarumaha caafimaadka si looga hortago qiimeyn aan nidaamsanayn ama ka faa'iideysi aan sharci ahayn.

- **Habka Ka-Qayb-Qaadashada Bulshada**

  Si loo yareeyo culayska dhaqaale ee ku dhaca Qoysaska loona xoojiyo mas'uuliyadda wadajirka ah ee maalgelinta caafimaadka, Wasaaradda Caafimaadku waxay tijaabin doontaa qaabab ku salaysan ka qayb-qaadashada bulshada, sida caymiska caafimaadka ku salaysan iyo keydadka caafimaadka ee bulshada.

  Nidaamyadani waxay u oggolaanayaan xubnaha bulshada in ay si wadajir ah u mideeyaan kheyraadkooda, si kharashaadka adeegyada caafimaadka loogu daboolo marka baahi timaaddo, taas oo yaraynaysa culayska dhaqaale ee qofka ama qoyska keligiis saaran.

Wasaaraddu waxay hirgelin doontaa tijaabooyin hordhac ah iyo wacyigelin bulsho si loo qiimeeyo suurtagalnimada, aqbalidda, iyo ku habboonaanta nidaamyadan, ka hor inta aan si ballaaran loo dhaqan-gelin. Qaababka la hirgeliyo waxaa loo dejin doonaa habraacyo cad oo daahfuran, kuwaas oo hubinaya in nidaamyadu taageeraan helitaanka adeegyada caafimaadka, isla markaana ay la jaanqaadaan mabaa'diida caddaaladda, daahfurnaanta, iyo joogteynta.

## 5.3 Jihada 3aad: Dhisidda Nidaam Maareyn Maaliyadeed Oo Xooggan

Jihada saddexaad ee siyaasadda waxay hirgelinaysaa daboolis kharash oo wax ku ool ah taas oo u baahan maamul maaliyadeed oo adag oo hufan, si loo dhiso kalsoonida bulshada looga hortago isticmaal khaldan loona hubiyo in dakhliga la ururiyo dib loogu celiyey nidaamka caafimaadka. Siyaasadani waxay qaadatay habkaan hoos ku xusan:

- **Nidaam Maareyn Maaliyadeed Oo Daahfuran**

  Wasaaraddu waxay hirgelin doontaa nidaam maareyn maaliyaddeed oo dhammaystiran, kaas oo si nidaamsan u diiwaangelinaya una soo tebinaaya dakhliga la ururiyo iyo kharashaadka la bixiyo. Nidaamkani waxa uu ka koobnaan doonaa hanti-dhowr joogto ah, warbixin maaliyadeed oo cad iyo habraacyo lagu hubinayo in dakhliga dib loogu maalgeliyo adeegyada caafimaadka.

Qodobada hirgelinta waxaa ka mid ah:

- Adeegsiga nidaamyo danabaysan oo lagu dabagalo dakhliga iyo kharashaadka.
- Hirgelinta hanti-dhowre gudaha ah.
- Soo saarista iyo daabacaadda warbixin maaliyadeed oo joogta ah.
- Dakhliga la ururiyo waxa si gaar ah loogu xidhayaa horumarinta xarumaha caafimaadka, oo ay ku jiraan dhismaha, qalabka, dawooyinka iyo dhiirrigelinta shaqaalaha.

- **Wacyigelin Iyo Baridda Bulshada Habka Daboolista Kharashka**

  Si loo xoojiyo fahamka iyo kalsoonida bulshada, Wasaaradda Caafimaadka waxay hirgelin doontaa barnaamijyo wacyigelin dadweyne, kuwaas oo bulshada lagu barayo sida uu u shaqeeyo nidaamka daboolista kharashaadka, ujeeddada khidmadaha adeegyada, iyo sida dakhliga loo isticmaalo.

Ololayaasha wacyigelinta waxay si cad u sharxi doonaan:

- Adeegyada laga qaadayo khidmadaha iyo sababta loo qaadayo.
- Sida nidaamka ka-dhaafista iyo ka-reebiddu u shaqeeyo.
- Sida khidmadaha loo adeegsado si loo horumariyo tayada adeegyada caafimaadka.

Daahfurnaanta iyo wacyigelinta joogtada ah waxay kor u qaadi doontaa kalsoonida bulshada, isla markaana waxay fududayn doontaa u hoggaansanaanta iyo bixinta khidmadaha si ikhtiyaari ah.

## 5.4 Jihada 4aad: Ka-Qayb-Galka Bulshada Ee Maamulka Iyo Kormeerka

Jihada afraad ee siyaasadda waa inay bulshadu si firfircoon uga qayb-galaan iyadoo xoojinaysa lahaanshaha, isla-xisaabtanka jawaab-celinta, nidaamka daboolista kharashaadka iyo adeegyada caafimaadka.

- **Guddiyada Caafimaadka Bulshada:**

  waxaa la awood-siin doonaa Guddiyada Caafimaadka Bulshada si ay u kormeeraan hirgelinta nidaamka daboolista kharashaadka heer deegaan, una hubiyaan in khidmadaha adeegyada si sax ah loo ururiyo, isla markaana xubnaha bulshadu ka qayb qaataan go'aamada la xiriira isticmaalka dakhliga.

  Qodobada hirgelinta waxaa ka mid ah:

  - In la dhiso ama la xoojiyo Guddiyada Caafimaadka Bulshada si ay ula socdaan ururinta khidmadaha, u xalliyaan khilaafaadka, una xaqiijiyaan isla-xisaabtan heer deegaan ah.
  - Ka-qayb-galka guddiyadani waxa uu xaqiijinayaa in hirgelintu la jaanqaaddo duruufaha deegaanka, isla markaana ay noqoto mid caddaalad ah marka la qaadayo lana kormeerayo khidmadaha adeegyada.

- **Habraacyada Jawaab-Celinta Iyo Cabashada Bulshada**

  La-tashiyo joogto ah iyo fadhiyo jawaab-celin bulsho ayaa la qaban doonaa si loo hubiyo in nidaamka daboolista kharashaadka uu ka jawaabayo baahiyaha dhabta ah ee bulshada, isla markaana dhibaato kasta si degdeg ah looga hortagayo oo loo xaliyo.

  Qodobada muhiimka ah waxaa ka mid ah:

  - In si joogto ah loo qabto kulammo ay bulshadu si toos ah uga hadli karto adeegyada caafimaadka, in la sameeyo habab qofku si qarsoodi ah ugu gudbin karo cabashadiisa, si muwaadiniintu ugu fududaato cabirida rayigooda ku saabsan tayada adeegyada, kharashaadka laga qaado iyo sida ay u helayaan adeegyada caafimaadka.
  - Hirgelinta nidaam cabasho-xallin oo shaqaynaya, kaas oo hubinaya in cabashooyinka loo wajaho si degdeg ah, caddaalad ah oo hufan.

## 5.5 Jihada 5aad: Kormeer Iyo Qiimeyn joogto ah

Kormeerka iyo qiimeynta waa arrin aas-aasi u ah hubinta in siyaasadda daboolista kharashaadka ay gaareyso natiijooyinka la doonayo, isla markaana lagu sameeyo hagaajin marka ay baahidu timaaddo. Siyaasaddani waxay qaadatay habkan hoos ku xusan:

- **Nidaam Kormeer Iyo Qiimeyn Oo Xooggan**

Wasaaradda Caafimaadka Dowladda Puntland waxay dhisi doontaa qaab-dhismeed kormeer iyo qiimayn ah oo dhammaystiran, si loo qiimeeyo waxtarka nidaamka daboolista kharashaadka. Nidaamkani waxa uu si gaar ah u cabbiri doonaa saameynta ay siyaasadda ku leedahay helitaanka adeegyada caafimaadka, joogtaynta dhaqaale ee xarumaha, iyo qanacsanaanta bulshada.

Arrimaha la kormeeri doono waxaa ka mid ah:

- ➢ Isbeddellada ku yimaadda isticmaalka adeegyada caafimaadka.
- ➢ Saameynta nidaamkani ku yeelanayo helitaanka adeegyada ee dadka nugul.
- ➢ Waxqabadka maaliyadeed ee xarumaha caafimaadka.
- ➢ Heerka qanacsanaanta bukaanka.

Xogta la ururiyo waxa loo adeegsan doonaa hagaajinta nidaamka, dib-u-habaynta tallaabooyinka hirgelinta iyo wax-ka-beddelka siyaasaddan marka loo baahdo.

- **Kulammada Dib-U-Eegista Iyo Wada-Tashiga**

Kulammo dib-u-eegis oo joogto ah ayaa lala yeelan doonaa daneeyeyaasha/bahwadaagta caafimaadka ay khusayso siyaasaddan oo ay ka mid yihiin maamulayaasha xarumaha caafimaadka, dowladaha hoose iyo wakiillada bulshada, si loo qiimeeyo horumarka loona wajaho caqabadaha soo baxa.

Qodobada hirgelinta waxaa ka mid ah:

- ➢ Qabashada kulammo saddex-biloodle ah ama laba-jeer sanadkii oo ay ka qayb galaan mas'uuliyiinta caafimaadka, daneeyeyaasha, ururrada bulshada rayidka ah iyo Guddiyada Caafimaadka Bulshada.
- ➢ Kulamadaani waxay xaqiijin doonaan barasho joogto ah, wadaagidda casharrada laga bartay iyo xoojinta nidaamka daboolista kharashaadka

# 6. Hirgalinta iyo Ansixinta Siyaasada

## 6.1 Doorarka Iyo Wajibaadka Hay'adaha Hirgelinta Siyaasadda

Hirgelinta Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka ee Puntland waxaa hoggaaminaysa Wasaaradda Caafimaadka, iyadoo si dhow ula shaqaynaysa hay'adaha kale ee dawladda, maamulada isbitaalada heer gobol iyo degmo, Xarun/baraha caafimaadka, saaxiibada horumarinta caafimaadka iyo bulshada qaybaheeda kala duwan. Hirgelinta siyaasaddani waxay ku dhisan tahay wada-shaqayn, isla-xisaabtan, daahfurnaan, iyo ilaalinta helitaanka adeegyada caafimaadka ee dadka nugul.

**1. Wasaaradda Caafimaadka Puntland**

Wasaaradda Caafimaadka Puntland waa hay'adda hoggaamineysa dejinta, hagidda, hirgelinta, iyo kormeerka guud ee Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Caafimaadka. Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay:

- Dejinta xeer-hoosaadyo, habraacyo iyo tilmaamo farsamo oo lagu dhaqan-gelinayo siyaasaddan.
- Mideynta iyo hagidda nidaamyada daboolista kharashaadka ee dalka oo dhan.
- Hubinta in siyaasaddu ay waafaqsan tahay, Shareecada Islamka, Dastuurka Puntland, Qorshaha Caafimaadka iyo mabaa'diida xuquuqda aadanaha.
- Kormeerka iyo qiimeynta saameynta siyaasadda, gaar ahaan helitaanka adeegyada aasaasiga ah iyo ilaalinta dadka nugul.
- Soo gudbinta warbixinno joogto ah oo ku saabsan hirgelinta siyaasadda kuna wajahan Xukuumada Puntland.

**2. Maamulada Caafimaadka Heer Gobol iyo Degmo**

Maamulada caafimaadka heer gobol iyo degmo waxay mas'uul ka yihiin hirgelinta siyaasadda heer deegaan, iyagoo:

- Kormeeraya hagayana xarumaha caafimaadka ee hoos yimaada.
- La soconaya ururinta iyo maareynta dakhliga laga helo khidmadaha adeegyada.
- Hubinaya in nidaamka ka-dhaafidda iyo taageeridda dadka nugul si sax ah oo caddaalad ah loo fuliyo.
- Usoo gudbinta wasaaradda warbixinno joogto ah oo ku saabsan hirgelinta siyaasadda.

### 3. Isbitaallada iyo Xarumaha Caafimaadka

Isbitaallada iyo xarumaha caafimaadka ee ay khusayso siyaasaddani waxay mas'uul ka yihiin fulinta maalinlaha ah ee nidaamka daboolista kharashaadka, iyagoo:

- Hirgelinaya khidmadaha adeegyada ee si rasmi ah loo ansixiyay, kuna shaqeynaya habraacyada la dejiyay.
- U diiwaangelinaya una kaydinaya dakhliga si nidaamsan oo hufan.
- Si cad ugu wargelinaya bukaanka khidmadaha jira, adeegyada bilaashka ah, iyo nidaamka ka-dhaafidda/ka-reebidda.
- Hubinaya in adeegyada aasaasiga ah si caddaalad ah loo bixiyo, gaar ahaan dadka nugul.
- Isticmaalaya dakhliga la ururiyo si gaar ah loogu horumariyo tayada adeegyada, qalabka, iyo agabka caafimaadka.
- Soo gudbinaya warbixinno maaliyadeed iyo kuwo adeeg-bixin ah oo joogto ah.

### 4. Guddiga Daboolista Kharashaadka

Waxaa la dhisayaa Guddiga Daboolista Kharashaadka, kaas oo ah guddi kormeer iyo talo bixin waxaana magacaabaya wasiirka wasaaradda caafimaadka xubnahaas oo ka koobnaan doona **5** xubnood.

Gudigu wuxuu mas'uul ka noqonayaa:

- La-socodka iyo kormeerka hirgelinta siyaasadda.
- Qiimeynta saameynta dhaqaale iyo mid bulsho ee nidaamka daboolista kharashaadka.
- Soo jeedinta talooyin iyo wax-ka-beddel ku saabsan khidmadaha iyo habraacyada.
- Hubinta in mabda'a ah **"**Waxyeello Ha U Geysan**"** si buuxda loo hirgeliyo, gaar ahaan marka ay timaaddo helitaanka adeegyada dadka nugul.

Sharuudaha laga rabo Gudiga:

1. Waa inuu ahaadaa muwaadin Soomaaliyeed oo reer Puntland ah.
2. Waa inaan lagu xukumin wax dembi ah 5ti sano ee udanbaysay.
3. Waa inuu leeyahay aqoon iyo waaya aragnimo maareynta Caafimaadka, maaliyada iyo maamulka.
4. Waa inuu xushmad iyo dhaqan suuban ku dhex leeyahay bulshada.
5. Waa inuu ahaadaa qof u hoggaansan Mabda'a Waxyeelo ha u gaysan.

Siyaasadani waxay yeelan doontaa lifaaqyo hagid ah kuwaaaso oo ay kamid ahaanayaan:

- ✓ Lifaqa Liiska Qiimeynta khidmadaha adeegyada.
- ✓ Hagayaasha siyaasadda.
- ✓ Guddiyo farsamo oo ka shaqayndoona dhammaan deeganada Puntland.

**5. Saaxiibada Horumarinta Caafimaadka iyo Hay'adaha aan Dawliga ahayn (NGOs)**

Saaxiibada horumarinta iyo hay'adaha aan dawliga ahayn waxay door ka qaadanayaan taageeridda hirgelinta siyaasadda, iyagoo:

- Bixinaya taageero farsamo iyo tababarro.
- Ka qayb qaadanaya tijaabinta habab cusub oo waxtar leh.
- Mararka qaarkood gacan ka geysanaya maalgelinta iyo xoojinta awoodda nidaamka caafimaadka.

**6. Guddiyada Caafimaadka Bulshada iyo Hoggaamiyeyaasha Deegaanka**

Guddiyada Caafimaadka Bulshada iyo hoggaamiyeyaasha deegaanka waxay kaalin muhiim ah ka qaadanayaan:

- Wacyigelinta bulshada ee ku saabsan siyaasadda daboolista kharashaadka.
- Xoojinta isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta heer bulsho.
- Hubinta in hirgelinta siyaasadda aysan wax u dhimayn helitaanka adeegyada caafimaadka ee dadka nugul.
- Gudbinta aragtiyaha, cabashooyinka iyo talooyinka bulshada.

## 6.2 Dhisidda fahamka guud iyo Tababarada shaqaalaha

Siyaasaddu waxay mudnaan siinaysaa tababar iyo dhisid fahan oo loo sameeyo shaqaalaha caafimaadka iyo maamulayaasha, gaar ahaan dhinacyada maamulka maaliyadda, ururinta dakhliga, warbixinta, iyo anshaxa, si loo hubiyo hirgelin hufan oo caddaalad ah.

## 6.3 Wacyigelin iyo Isgaarsiin Dadweyne

Bulshada waxaa si joogto ah loogu wargelin doonaa ujeeddada siyaasadda, khidmadaha adeegyada, iyo nidaamka ka-dhaafidda, iyadoo la adeegsanayo kulammo bulsho, warbaahin, iyo hoggaamiyeyaasha deegaanka, si loo dhiso kalsooni iyo faham guud.

## 6.4 Ansixin, Dhaqan-Gal iyo Wax-kabadel

Siyaasadda Daboolista Kharashaadka Adeegyada Caafimaadka waxaa diyaarinaysa Wasaaradda Caafimaadka Puntland, iyadoo la tashaneysa bahwadaagta caafimaadka ee ay khusayso. Marka la dhammaystiro diyaarinteeda, siyaasadda waxaa si rasmi ah loogu gudbinayaa Golaha Wasiirrada Puntland si loo ansixiyo. Siyaasaddu waxay dhaqan-galaysaa laga bilaabo taariikhda ay Golaha Wasiirradu si rasmi ah u ansixiyaan, waxaana lagu dabaqi doonaa dhammaan xarumaha caafimaadka ee deegaanada Puntland.

Wax-ka-beddel, dib-u-eegis, ama cusboonaysiin kasta oo lagu sameeyo siyaasaddan waxa lagu fulin karaa oo keliya habraac sharci ah, iyadoo lagu saleynayo natiijooyinka kormeerka, qiimeynta wixii laga bartay hirgelinta iyo baahiyaha dhabta ah ee nidaamka caafimaadka Puntland. dib-u-eegista noocan ah waa in ay ilaalisaa ujeeddooyinka guud ee siyaasadda, gaar ahaan xaqiijinta helitaanka adeegyada caafimaadka ee dadka nugul.

PUNTLAND MINISTRY of HEALTH

PUNTLAND